Ohio Department of Health

Mike DeWine, Governor
Jon Husted, Lt. Governor

Amy Acton, M.D., MPH, Director

AMARKA AGAASIMAHA EE AH GURIGA JOOG

Tixraac: Amarka Agaasimaha ee ah in Dadka oo Dhami ay Guriga Joogaan Haddii aysan Qabanaynin shaqo ama Hawlo Muhiim ah

Aniga oo ah, Amy Acton, MD, MPH, Agaasimaha Waaxda Caafimaadka ee Ohio (ODH), iyada oo la raacayo awoodda laygu siiyay R.C. 3701.13 si aan "u soo jeediyo amarro gaar ah...ka hortagaya faafitaanka cudurada la is qaadsiin karo ama faafa" **Amrayaa** waxyaabahan soo socda si looga hortago ku faafidda caabuqa COVID-19 Gobolka Ohio:

1. **Joog guriga ama meeshaad deggan tahay**. Marka laga reebo waxyaabaha hoos ku xusan, dhamaan shaqsiyaadka hada ku nool Gobolka Ohio waxaa lagu amrayaa inay joogaan guriga ama meeshay deggan yihiin marka laga reebo sida lagu oggol yahay Amarkan. Illaa xad ay shaqsiyaadku isticmaalayaan meelaha la wadaago ama banaanka markii ay ka baxsan yihiin hoygooda, waa inay had iyo jeer sida ugu macquulsan oo suurtagalka ah, ilaaliyaan kala fogaanshaha bulshada ugu yaraan isku jiraan lix fuudh qof kasta, marka laga reebo reerka ama xubnaha reerka, iyadoo la raacayo Shuruudaha Kala Fogaanshaha Bulshada lagu sheegay Amarkan. Dhammaan dadku waxay ugasoo bixi karaan guryahooda ama meesha ay deggan yihiin oo keliya Hawlo Muhiim ah, Shaqooyinka Dawladeed ee Muhiimka ah, ama inay ka qeybgalaan Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka ah, dhammaantood sida hoos lagu qeexay.

   Shakhsiyaadka la kulmaya hoy la'aan ayaa laga reebay Amarkan, laakiin waxaa si xoogan loogu boorinayaa inay helaan hoy, iyo dawladda iyo hay'adaha kaleba waxaa si xoogan loogu boorinayaa inay ka dhigaan hoyga noocaas ah mid lagu heli karo sida ugu dhaqsaha badan uguna macquulsan (una isticmaalaan hawlahooda kusaabsan dhaqamada yareynta halista caabuqa COVID-19 ee uu soo jeediyo Xarumaha. Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurrada ee Mareykanku (CDC) iyo Waaxda Caafimaadka ee Ohio (ODH). Amarkani ma khuseeyo shaqsiyaadka xiran, waa inay raacaan hagida xarunta ay ku xiran yihiin. Shakhsiyaadka guryahoodu aan ahayn amaan ama noqdeen kuwo aan amaan ahayn, sida dhibanayaasha rabshadaha qoyska, waxaa loo oggolyahay laguna boorinayaa inay kasoo baxaan gurigooda oo ay joogaan meel kale oo amaan ah. Ujeeddooyinka Amarkaan, guryaha ama meelaha la deggan yahay waxaa ku jira hoteellada, hoteellada-waddada ku yaal, guryaha kirada ah ee la wadaago, hoyga, iyo xarumaha la midka ah.

2. **Ganacsiga aan muhiimka ahayn iyo hawlgallada waa in la joojiyaa**. Dhammaan ganacsiyada iyo hawlgallada Gobolka, marka laga reebo Ganacsiyada iyo Hawlgallada muhiimka ah sida hoos lagu qeexay, waxaa looga baahan yahay inay joojiyaan dhammaan hawlaha ka socda Gobolka marka laga reebo Hawlaha Aasaasiga ah ee Ugu Yar, sida lagu qeexay hoosta. Caddayn ahaan, ganacsiyada, oo ay ku jiraan meheradaha ku saleysan guriga, waxay sidoo kale sii wadi karaan hawlgallada gaar u ah shaqaalaha ama qandaraasleyaasha ka fulinaya hawlahooda dhismahooda (tusaale, kaga shaqaynaya guriga).

   Dhammaan Ganacsiyaadka iyo Hawlgallada Muhiimka ah waxaa lagu dhiirigelinayaa inay sii furnaadaan. Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka ah ayaa u hoggaansami doona Shuruudaha

Kala Fogaanshaha Bulshada sida lagu qeexay Amarkan, oo ay kujirto sii wadida kala fogaanshaha bulshada ilaa lix dhudhun labadaba shaqaalaha iyo xubnaha bulshada waqti kasta, oo ay kujirto, laakiin aan ku xadidneyn, goorta macaamiil kasta uu safka taagan yahay .

3. **Hawlaha la mamnuucay.** Dhammaan shirarka dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee tiro kasta oo dad ah oo ka dhaca meel ka baxsan hal guri ama goobta lagu noolyahay waa la mamnuucay, marka laga reebo ujeeddooyinka xaddidan ee uu oggolyahay Amarkan. Kulan kasta oo ka badan toban qof waa la mamnuucay haddii uusan Amarkan ka reebayn. Tani waxay waafaqsan tahay tilmaamaha caabuqa coronavirus ee Madaxweyne Trump ee la soo saaray Maarso 16, 2020. Kuma jiraan Amarkan wax mamnuucaya isu imaatinka xubnaha reerka ama guriga.

   Dhammaan goobaha madadaalada dadweynaha, ha noqoto gudaha ama banaanka, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidneyn, goobaha leh meelo lagu ciyaaro, baakinada, beeraha nasashada, barkadaha biyaha, dhalooyinka biyaha lagu shubo, beeraha xayawaanada, matxafyada, ciyaaraha muuqaalka, carwooyinka, xarumaha ciyaarta carruurta, garoomada ciyaarta, tartamada, dulucda jardiinooyinka, meelaha lagu ciyaaro, masraxyada iyo tiyaatarada kale, riwaayadaha iyo hoolalka muusikada, iyo naadiyada dalka ama naadiyada bulshada waa in la xiraa.

4. **Safarada la mamnuucay iyo kuwa la oggol yahay.** Kaliya Safarka Aasaasiga ah iyo Hawlaha Muhiimka ah sida lagu qeexay halkan, ayaa la oggol yahay. Dadka raacaya gaadiidka dadweynaha waa inay u hoggaansamaan Shuruudaha Kala fogaanshaha Bulshada illaa inta ugu macquulsan ee suurtagal ah. Amarkani wuxuu u oggolaanayaa safarka gudaha ama dibedda Gobolka si loo joogteeyo Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka ah iyo Hawlgallada Aasaasiga ah ee Ugu Yar.

5. **Uga bixida guriga Hawlo Muhiim ah waa la oggol yahay.** Ujeeddooyinka Amarkan, shakhsiyaadku way uga bixi karaan gurigooda kaliya si ay u qabtaan mid ka mid ah Hawlahan Muhiimka ah ee soo socda:

   a. **Caafimaad iyo badbaado**. Inay sameeyaan hawlo ama qabtaan hawlo muhiim u ah caafimaadkooda iyo badbaadadooda, ama caafimaadka iyo badbaadada qoyskooda ama xubnaha reerka ama dad aan awoodin ama aan ka tagi karin gurigooda (oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xadidneyn, xayawaannada guryaha lagu haysto), sida , tusaale ahaan kaliya oo aan xadidnayn, raadinta adeegyada gurmadka, helitaanka agabyo caafimaad ama daawo, ama booqanaya xirfadle daryeel caafimaad.

   b. **Agabyada iyo adeegyada lagama maarmaanka ah.** Si ay ugu helaan adeegyo ama agabyo lagama maarmaan u ah naftooda iyo qoyskooda ama xubnaha reerka ama dad aan awoodin ama aan ka bixin gurigooda, ama in la gaarsiiyo adeegyadan ama agabyadan dadka kale, sida tusaale ahaan oo keliya oo aan xadidneyn, carwooyinka iyo cuntada, alaabada reerku isticmaalo, agabyada ay ugu baahan yihiin si ay uga shaqeeyaan guriga, agabyada gawaarida (oo ay ku jiraan kuwa iibiya, qeybaha, agabyada, hagaajinta iyo dayactirka), iyo alaabada lagama maarmaanka u ah dhowrista badbaadada, jeermis dilista, iyo hawlaha lagama maarmaanka u ah guryaha la deggan yahay.

   c. **Hawlaha bannaanka.** Si looga qayb qaato hawlaha bannaanka, haddii shakhsiyaadka ay u hoggaansamaan Shuruudaha Kala fogaanshaha Bulshada, sida hoos lagu qeexay, sida, tusaale ahaan oo aan xadidneyn, socod, socod-masaafeed, orod, ama baaskiil wadis. Shakhsiyaadku waxay aadi karaan jardiinooyinka dadweynaha iyo meelaha lagu nasto ee bannaanka. Si

kastaba ha ahaatee, isticmaalida garoomada lagu ciyaaro ee dadweynaha waxay kordhin karaan faafitaanka caabuqa COVID-19, sidaas darteedna waa in la xiraa.

d. **Shaqooyinka qaarkood** In lagu qabto shaqo soo saarayso alaabo iyo adeegyada lagama maarmaan ah Ganacsiyada ama Hawlgallada Muhiimka ah (kuwaas, sida hoos lagu qeexay, ay ka mid yihiin Daryeel Caafimaad iyo Hawlgallada Caafimaadka Dadweynaha, Hawlgallada Adeegyada Aadanaha, Shaqooyinka dawladda ee Muhiimka ah, iyo Kaabayaasha Muhiimka ah) ama si kale loogu fuliyo hawlo si gaar ah loo oggol yahay Amarkan, oo ay ku jiraan Hawlgallada Aasaasiga ah ee Ugu Yar

e. **Si loo daryeelo dadka kale.** Si loo daryeelo xubin reerka ka mid ah, saaxiib, ama xayawaan rabaayad ah oo ku nool guri kale, iyo in lagu qaado gaadiid xubnaha qoyska, asxaabta, ama xayawaanno rabaayad ah sida uu Amarkan oggol yahay. Tan waxaa ka mid ah ka qeybgalka aroosyada iyo aaska.

6. **Dadka da'da ah iyo kuwa nugul xanuun awgiis waa inay qaadaan taxaddar dheeraad ah.** Dadka halista daran ugu jira jirada COVID-19, oo ay ku jiraan dadka da'da ah iyo kuwa jiran, waxaa lagu boorinayaa inay joogaan gurigooda ilaa inta suurtogalka ah marka laga reebo sida ay lagama maarmaanka u tahay inay raadsadaan daryeel caafimaad. Ma jiro wax ku jira Amarkan oo ka mamnuucaya Waaxda Caafimaadka ama waaxaha caafimaadka deegaanka inay soo saaraan oo ay dhaqan geliyaan amarada go'doominta iyo karantiilida.

7. **Daryeelka Caafimaadka iyo Hawlgallada Caafimaadka Dadweynaha.** Ujeeddooyinka Amarkan, shakhsiyaadku way uga bixi karaan gurigooda si ay ugu shaqeeyaan ama u helaan adeegyo Daryeel Caafimaad iyo Hawlgallada Caafimaadka Dadweynaha.

   Daryeelka Caafimaadka iyo Hawlgallada Caafimaadka Dadweynaha waxaa ka mid ah, laakiin kuma xadidna: isbitaallada; rugaha caafimaad; xafiisyada ilkaha; farmashiyada; hay'adaha caafimaadka dadweynaha, oo ay ku jiraan kuwa uruuriya, qaabeeyo, falanqeeya oo baahiyaha macluumaadka caafimaadka dadweynaha; dawooyinka, farmashiga, aaladda iyo qalabka caafimaadka, iyo shirkadaha bayoteknoolojiga (oo ay ku jiraan hawlgallada, cilmi baarisaha iyo horumarinaha, soosaaridda, iyo silsiladda waxsoosaarka); ururada ururiya dhiiga, platelets-ka dhiiga midab la'aanta ah, iyo agabyada kale ee daruuriga ah; Xarumaha xashiishad oo shati caafimaad leh iyo xarumo beerista xashiishad caafimaad oo shati leh; dhakhaatiirta dumarka uurka leh iyo haweenka kale; xarumaha daryeelka indhaha, oo ay ku jiraan kuwa iibiya muraayadaha indhaha iyo muraayadaha qaba weynaysada; bixiyeyaasha adeegyada daryeelka caafimaadka ee guriga; bixiyeyaasha caafimaadka dhimirka iyo adeegsiga maandooriyaha; agabyo iyo xarumo caafimaad oo kale iyo bixiyeyaal adeegyo daryeel caafimaad oo kasta oo la xiriira ama daryeel caafimaad aasaasi ah; iyo hay'adaha safrinaya ama burburinaya agabyada caafimaad iyo waxyaabaha soo haray.

   Si gaar ah loogu daray in Daryeelka Caafimaadka iyo Hawlgallada Caafimaadka Dadweynaha ay yihiin soo-saareyaal, farsamoyaqaanno, saad, iyo hawl-wadeennada bakhaarka iyo qeybiyayaasha qalabka caafimaadka, qalabka ilaalinta shaqsiyadeed (PPE), naqasyada caafimaadka, daawooyinka, dhiiga iyo waxsoosaarka dhiiga, tallaalada, agabyada tijaabada, agabyada sheybaarka, nadiifinta , jeermis dilista, jeermis-ka-qaadista ama sifeynta agabyada, iyo alaabaha ah warqad iyo shukumaan.

Daryeelka Caafimaadka iyo Hawlgallada Caafimaadka Dadweynaha sidoo kale waxaa ka mid ah daryeelka caafimaadka xoolaha iyo dhammaan adeegyada daryeelka caafimaad ee la siiyo xoolaha.

Daryeelka Caafimaadka iyo Hawlgallada Caafimaadka Dadweynaha waa in loo dhiso si ballaadhan si looga fogaado wax kasta oo saamayn ku yeelan kara gaarsiinta daryeel caafimaad, oo si ballaadhan loo qeexay. Daryeelka Caafimaadka iyo Hawlgallada Caafimaadka Dadweynaha kuma jiraan jir dhisida iyo jimicsiga jiimka, masaajada, cilaan saarka, meelaha timaha lagu jaro, goobaha shabada, iyo xarumaha la midka ah.

8. **Hawlgallada Adeegyada Aadanaha.** Ujeeddooyinka Amarkan, shakhsiyaadku way uga bixi karaan gurigooda si ay uga shaqeeyaan ama uga helaan adeegyo ku aadan hawlo kasta oo Adeegyada Aadanaha ah, oo ay kujirto bixiye kasta oo ay maalgaliso Waaxda Ohio ee Gabowga, Waaxda Naafonimada Koboceed, Waaxda Caafimaadka, Waaxda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska, Waaxda Medicaid, Waaxda Caafimaadka Dhimirka iyo Adeegyada Laqabsiga, Fursadaha loogu talagalay dadka Reer Ohio ee Naafada ah, Waaxda Adeegyada Ciidamada Hawlgabka ah, iyo Waaxda Adeegyada Dhalinta ee u fidisa adeegyo dadweynaha oo ay kujirto aagaga ay maamusho dawlad, hay'ad, ama ku-saleysan bulsho ee siiya dadweynaha adeegyada aadanaha.

   Hawlaha Adeegyada Aadanaha waxaa ka mid ah, laakiin kuma xaddidna: Xarumaha daryeelka muddada-dheer; xarumaha xanaano maalmeedka, guryaha xanaano maalmeedka, kooxaha xanaano maalmeedka ku bixiya guryaha; goobaha ay kuyaalaan guryaha iyo hoyga loogu talagalay dadka waaweyn, waayeelka, carruurta, iyo/ama dadka qaba naafonimada koboceed, naafonimada garaadka, dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha, iyo/ama xanuunka dhimirka; xarumaha ku meel gaarka ah; goobaha guriga ku saleysan si ay u siiyaan adeegyo shaqsiyaadka qaba naafonimada jireed, caqli, iyo/ama koboceed, dadka waayeelka ah, dadka waaweyn, iyo carruurta; Xafiisyada bixiya kana caawiya go'aaminta u-qalmitaanka baahiyaha aasaasiga ah oo ay ka mid yihiin cuntada, gargaarka lacageed, caynsanaanta caafimaadka, daryeelka ilmaha, adeegyada xirfadda, adeegyada dhaqan-celinta; xarumaha horumarka; wakaaladaha korsashada; ganacsiyada bixiya cunto, hoy, iyo adeegyo bulsheed, iyo baahiyaha kale ee lagama maarmaanka u ah nolosha shakhsiyaadka dhaqaalahoodu liido, shaqsiyaadka qaba naafonimada jireed, caqli, iyo/ama koboceed, ama haddii kale shaqsiyaad baahi u qaba.

   Hawlgallada Adeegyada Aadanaha waa in loo fasirto si ballaadhan si looga fogaado wax kasta oo saameyn ku yeelan kara gaarsiinta adeegyada dadka, si ballaaran ayaa loo qeexay.

9. **Kaabayaasha Aasaasiga ah.** Ujeeddooyinka tan, shakhsiyaadku way ka bixi karaan guryahooda si ay u bixiyaan wax adeegyo ah ama ay qabtaan waxkastoo shaqo ah oo lagama maarmaan u ah inay siiyaan, bixiyaan, shaqeeyaan, joogteeyaan oo ay hagaajiyaan Kaabayaasha Aasaasiga ah.

   Kaabayaasha Aasaasiga ah waxaa ka mid ah, laakiin kuma xaddidna: soo saarka cuntada, qaybinta, xarumaha fulinta, xarumaha kaydinta, xeebta, iyo iibinta; dhismaha (oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, dhismaha loo baahan yahay si looga jawaabo xaaladdan caafimaad ee degdegga ah ee dadweynaha, dhismaha isbitaalka, dhismaha xarumaha daryeelka muddada-dheer, dhismaha hawlaha guud, dhismaha dugsiga, dhismaha ganacsiga aasaasiga ah, iyo dhismaha guryaha); maaraynta iyo dayactirka dhismaha; hawlgallada garoonka diyaaradaha; hawlgalka iyo dayactirka adeegyada, ay ku jiraan biyaha, bulaacadaha, iyo naqska; korantada (oo ay ku jiraan abuurista

korantada, qaybinta, iyo soo saarista agabyada wax laga soo saaro); xarumaha qaybinta; saliida iyo nadiifinta shidaalka laga sameeyo noolaha; wadooyinka, wadooyinka waaweyn, jidadka tareenka, iyo gaadiidka dadweynaha; dekedaha; hawlgallada amniga internetka; xakameynta fatahaada; aruurinta iyo saarista qashinka adag iyo dib u warshadaynta; iyo internetka, fiidiyowga, iyo nidaamyada isgaarsiinta (oo ay ku jiraan bixinta kaabayaasha aasaasiga ah ee caalam ahaan, qaran, iyo maxalliga ah ee loo isticmaalo adeegyada kumbuyuutarka, kaabayaasha ganacsiga, isgaarsiinta, iyo adeegyada ku saleysan internetka).

Kaabayaasha lagama maarmaanka ah waa in loo fasiraa si balaaran si looga fogaado wax kasta oo saameyn ku yeelanaya kaabayaasha lagama maarmaanka ah, oo si ballaaran loo qeexay.

10. **Shaqooyinka Dawladda ee Muhiimka ah**. Ujeeddooyinka Amarkan, dhammaan jawaabiyeyaasha ugu horreeya, shaqaalaha maaraynta xaaladda degdegga ah, dirayaasha gurmadka, sharci dejiyayaasha, garsoorayaasha, shaqaalaha maxkamadda, dadka ka tirsan maxkamadda iyo dadka loo xushay dhagaysiga kiis, xoojinta sharciga iyo shaqaalaha asluubta, ka jawaabayaasha qalabka halista ah, shaqaalaha badbaadinta carruurta iyo daryeelka carruurta, shaqaalaha guryeynta iyo hoyga, milatariga, iyo shaqaalaha kale ee dawladda ee u shaqeeya ama taageeraya Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka ah ayaa si cad looga reebay Amarkan.

    Shaqooyinka Dawladda ee Muhiimka ah waxaa loola jeedaa dhammaan adeegyada ay bixiso Gobolka ama degmo kasta, maamulka-magaalada, degmo, koox-hoosaad siyaasadeed, gole, guddi ama hay'ad dowladeed oo loo baahan yahay si loo hubiyo sii wadista hawlaha hay'adaha dawladda ama in la bixiyo ama lagu taageero caafimaadka, amniga iyo daryeelka bulshada, oo ay ku jiraan qandaraaslayaasha fulinaya Shaqooyinka Dawladda ee Muhiimka ah. Hay'ad kasta oo dawladeed waa inay go'aamisaa Shaqooyinkeeda Dawladeed ee Muhiimka ah ayna tilmaamto shaqaalaha iyo/ama qandaraasleyaasha lagama maarmaanka u ah fulinta shaqooyinkaas.

    Amarkan ma quseeyo dawladda Mareykanka. Ma jiro wax Amarkan ah oo ka mamnuucaya shaqsi kasta oo qabanaya ama isticmaalaya Shaqooyinka Dawladeed ee Muhiimka ah.

11. **Ganacsiyada uu daboolay Amarkan.** Ujeeddooyinka Amarkan, ganacsiyada la cayimay waxaa ka mid ah hay'adaha macaash doonka ah, aan macaash doon ahayn, ama waxbarasho, iyadoon loo eegaynin nooca adeegga, shaqada ay qabato, dhismeedkeeda shirkadeed ama hay'adeed.

12. **Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka ah.** Ujeeddooyinka Amarkan, Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka ah ayaa macnaheedu yahay Hawlgallada Daryeel Caafimaad iyo Caafimaadka Dadweynaha, Hawlgallada Adeegyada Aadanaha, Shaqooyinka dawladda ee Aasaasiga ah, iyo Kaabayaasha Muhiimka ah, iyo waxyaabaha soo socda:

    a. **Liiska CISA**. Maarso 19, 2020, Mareykanka. Waaxda Amniga Wadanka, Hay'adda Amniga Kombuyuutarka iyo Amniga Kaabayaasha (CISA), ayaa soo saartay *Qoraal ku Saabsan Aqoonsiga Shaqaalaha Kaabayaasha Aasaasiga ee Muhiimka ah inta lagu gudajiro Falcelinta caabuqa COVID-19.* Qeexitaanka Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka u ah Amarkan waxaa ka mid ah dhammaan shaqaalaha lagu aqoonsaday Qoraalkaas.

    b. **Bakhaarada iibiya raashinka iyo daawada.** Bakhaarada raashinka, farmashiyada, suuqyada beeraleyda la xaqiijiyay, tukaamada khudaarta, dukaamada waaweyn, tukaanada aalaaba

furan, iyo xarumaha kale ee ku hawlan iibinta tafaariiqda, cuntada qasacadaysan, alaabaha qalalan, cunnooyinka la qalajiyey, miraha iyo khudradda cusub, agabyada xayawaanka, hilib cusub, kalluun, iyo digaag, cunto diyaarsan, cabbitaanno aalkolo iyo cabitaano alkolo kujirin, alaabaha kale ee reerka isticmaalo (sida alaabaha nadiifinta iyo daryeelka shaqsiyadeed), waxaana si gaar ah ugu jira silsiladda waxsoosaarka iyo hawlgallada taageerada maamulka. Tan waxaa ka mid ah bakhaarada iibiya raashinka, dawooyinka, oo ay ku jiraan dawooyinka aan u baahnayn inuu dhakhtar kusoo qoro, iyo sidoo kale kuwa iibiya alaabooyinka kale ee aan raashin ahayn, iyo alaabaha lagama maarmaanka u ah dhowrista amniga, jeermis ka dilista, iyo hawlgallada lama huraanka ah ee guryaha iyo Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka ah;

c. **Cuntada, cabitaanada, iyo soosaarida waxyaabaha laga sameeyo xashiishka iyo beeraha ee rukhsada leh**. Warshadeynta, soo saarka, habaynta, iyo qodista, ay ku jiraan beeraha, xoolaha la dhaqdo, kalluumeysiga, dubista, iyo wax soo saarka kale ee beeraha, oo ay ku jiraan qodista, suuq geynta, soo saarka, iyo qeybinta xoolaha iyo badeecadaha si loo isticmaalo; isticmaalka xashiishka caafimaad ahaan la siiyay rukhsad, xarumaha xashiishka caafimaadka iyo xarumaha lagu beeray xashiishka caafimaadka ee ruqsada leh; iyo ganacsiyada bixiya cuntada, hoyga, iyo waxyaabaha kale ee daruuriga u ah nolosha xoolaha, oo ay ku jiraan hoyga xoolaha, badbaadiyaasha, hoyga, guryaha xayawaanada, iyo xarumaha korsashada;

d. **Ururada bixiya adeegyada samafalka iyo kuwa bulshada.** Ganacsiyada iyo ururada samafalka diini iyo dunubi, oo ay kujiraan bangiyada cuntada, markay bixinayaan cunto, hoy, iyo adeegyo bulsheed, iyo waxyaabaha kale ee nolosha loogu baahan yahay ee la siiyo dad dhaqaale ahaan liita ama haddii kale shaqsiyaad u baahan, shaqsiyaad u baahan caawimaad taas oo ay sabab u tahay xaaladdan degdegga ah, iyo dadka naafada ah;

e. **Hay'adaha diiniga ah.** Xarumaha, ururada iyo kooxaha diiniga iyo isu imaatinka diiniga ah, oo ay ku jiraan aroosyada iyo aasaska.

f. **Warbaahinta.** Joornaalada, telefishanka, raadiyaha, iyo adeegyada kale ee warbaahinta;

g. **Bedelka koowaad ee hadalka ilaaliya.**

h. **Saldhigyada shidaalka iyo meheradaha u baahan gaadiid.** Kaalmaha shidaalka iyo agabyada gawaarida, dayactirka gawaarida, qalabka beeraha, qalabka dhismaha, dayactirka doonta, iyo xarumaha la xiriira iyo tukaanada baaskiilka iyo xarumaha la xiriira;

i. **Hay'adaha maaliyadda iyo caymiska.** Bangiga, sarifka, amaah bixiyayaasha macaamiisha, oo ay kujirto laakiin aan ku xadidneyn, amaah bixiyayaasha, amaah bixiyayaasha inyar inyar loo bixiyo amaahda ee macaamiisha iyo amaah bixiyeyaasha dhanka iibsiga, ururada amaahda, qiimeeyeyaasha, shirkadaha cinwaanka, suuqyada maaliyadeed, sarifka ganacsiga iyo mustaqbalka, deyn-bixiyeyaasha maalinta, shirkadaha ku xiran hay'adaha maaliyadeed, hay'adaha soo saara dammaanadaha, hay'adaha maaliyadeed ee la xiriira, iyo hay'adaha iibiya badeecadaha maaliyadeed. Sidoo kale shirkadaha caymiska, dammaanad-bixiyayaasha, wakiillada, dillaaliyeyaasha, iyo sheegashooyinka caymiska ee la xiriira iyo adeegyada hay'adda;

j. **Bakhaarada alaabaha adag iyo agabyada.** Bakhaarada iyo ganacsiga alaabada adag ee iibiya qaabla korantada, biyo-galinta, iyo qalabka wax lagu kuleyliyo;

k. **Xirfadaha muhiimka ah.** Xirfadlayaasha dhiska ka shaqeeya ee rag iyo haweenka ah, iyo xirfadaha kale oo ay ka mid yihiin laakiin aan ku xaddidneyn biyo-galinta, koronto-yaqaannada, buufiyayaasha cayayaanka, shaqaalaha nadaafadda iyo waardiyeyaasha guryaha ganacsiga iyo hantida dawladda, shaqaalaha amniga, injineerada ka shaqeeya, HVAC, ranjiyeynta, adeegyada guurista iyo dib u dejinta, iyo adeeg bixiyaasha kale ee bixiya adeegyada lagama maarmaanka u ah dhowrista amniga, nadaafadda, iyo hawlgallada lama huraanka ah ee guryaha, Hawlaha Muhiimka ah, iyo Ganacsiyadaha iyo Hawlgallada Muhiimka ah;

l. **Adeegyada Boostada, warqadaha, dhoofinta, saadka, gaarsiinta, iyo soo qaadista.** Xafiisyada boostada iyo meheradaha kale ee bixiya adeegyada dhoofinta iyo gaarsiinta, iyo ganacsiyada soo dhoofiya ama keena raashinka, cuntada, cabbitaanka ka samysan alkolada iyo cabitaanada aan kujirin alkolada, alaabada, gawaarida ama adeegyada macaamiisha ama iyada oo loo maraayo kanaallada ganacsiga;

m. **Hay'adaha waxbarashada.** Hay'adaha waxbarashada oo ay kujiraan dugsiyada pre-K-12 ee dadwaynaha iyo kuwa sida gaarka loo leeyahay, kuliyadaha, iyo jaamacadaha–ujeeddooyinkoodu tahay fududeynta waxbarashada masaafada, sameynta cilmi baaris muhiim ah, ama qabashada hawlo muhiim ah, haddii kala fogaanshaha bulshada ee lix-fuudh qofkiiba la ilaaliyo illaa inta ugu macquulsan. Amarkani waa mid joogto ah mana beddelo ama ma galo Amarro hore oo khuseeya xidhitaanka dugsiyada;

n. **Adeegyada dhar maydhka.** Qalabka dharka lagu dhaqo, kuwa nadiifiyaha qalalan, adeegyada shirkada dhar dhaqista, iyo bixiyeyaasha adeegga dhar dhaqista;

o. **Makhaayadaha isticmaalka bannaanka.** Makhaayadaha iyo xarumaha kale ee diyaariya bixiyaha cuntada, laakiin loogu talagalay bannaanka dhismayaasha, oo ay ka mid yihiin keenida guriga, keenida cid saddexaad, gaadiid usoo qaadashada, kasoo qaadashada dhinacyada wadida, iyo sameynta. Dugsiyada iyo hay'adaha kale ee sida caadiga ah siiya adeegyada cuntada ardayda ama xubnaha bulshada wey sii wadan karaan inay sidaas sameeyaan iyadoo la raacayo Amarkan wehelisana shuruudda ah in cuntada la siiyo ardayda ama xubnaha dadweynaha si ay xaafadahooda ugu qaataan kaliya. Dugsiyada iyo hay'adaha kale ee bixiya adeegyada cuntada ee ka-reeban xaaladan waa inaanay oggolaanin in cuntada lagu cuno goobta laga bixiyo, ama goob kasta oo kale oo lagu kulmo iyadoo ay ugu wacan tahay fiditaanka fayrasku u leeyahay koritaanka jirka iyo hantida shaqsiyeed. Amarkani waa mid joogta ah mana beddelo ama mana qaato Amarro hore oo khuseeya xiritaanka makhaayadaha;

p. **Alaabta guriga looga soo shaqeeyo.** Ganacsiyada kuwaas oo iibiya, soosaara, ama keenaya badeecado loo baahan yahay si dadka ay ugu shaqeeyaan guriga;

q. **Agabyada Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka ah.** Ganacsiyada kuwaas oo iibiya, soosaara, ama bixiya Ganacsiyada iyo Hawlgallada kale ee Muhiimka ah iyadoo leh taageerada ama agabyada lagama maarmaanka u ah inay ku shaqeeyaan, oo ay ku jiraan kombuyuutarrada, qalabka maqalka iyo muuqaalka, qalabka guryaha; Qalabka IT iyo isgaarsiinta; alaabta adag, rinjiga, muraayadaha fidsan; qalabka korantada, biyo-galinta iyo qalabka wax lagu kululeeyo; qalabka fayadhowrka; waxyaabaha nadaafadda shaqsiyeed; cuntada, waxyaabaha cuntada lagu daro, qaybaha iyo waxay ka kooban yihiin; qalabka caafimaadka iyo dhakhtarka murqaha; qalabka indhaha iyo qalabka sawir qaadista; baarista, cuntada iyo cabbitaannada,

kiimikooyinka, saabuunnada iyo oomada; iyo shirkadaha hubka iyo rasaasta ula jeeddooyin xagga badqabka iyo amniga;

r. **Gaadiidka.** Diyaaradaha, tagaasida, bixiyayaasha shabakadaha gaadiidka (sida Uber iyo Lyft), adeegyada kirada baabuurta, paratransit, xeebta, doomaha, keydinta doonyaha, iyo kuwa kale ee gaarka loo leeyahay, dadweynaha, iyo gaadiidka ganacsiga iyo bixiyayaasha saadka ee lagama maarmaanka u ah hawlaha Muhiimka ah iyo ujeedooyin kale oo si cad loogu ogolaaday gudaha Amarkan;

s. **Adeegtada iyo daryeelka guriga ku saleysan.** Adeegyada daryeelka guriga ku saleysan ee loogu talagalay dadka qaan gaarka, waayeelka, carruurta, iyo/ama dadka qaba naafonimada dhanka kobaca, naafonimada garaadka, dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha, iyo/ama jirrada dhimirka, oo ay ku jiraan daryeel bixiyayaasha sida nuujiso u safri karto guriga ilmaha si ay u siiso daryeel, iyo kuwa kale adeegyada guriga ah oo ay ku jiraan geynta cuntada;

t. **Xarumaha guryaha la dego iyo hoyga.** Xarumaha guryaha la dego iyo hoyga loogu talagalay dadka qaangaarka, waayeelka, carruurta, xayawaanka rabaayada ah, iyo/ama dadka qaba naafonimada dhanka kobaca, naafonimada garaadka, dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha, iyo/ama xanuunka dhimirka;

u. **Adeegyada xirfadleyda.** Adeegyada xirfadleyda, sida adeegyada sharciga, adeegyada xisaabinta, adeegyada caymiska, adeegyada guryaha (marka lagu daro adeegyada qiimeynta iyo cinwaanka);

v. **Soosaarka, qaybinta, iyo silsiladda waxsoosaarka ee alaabada iyo warshadaha muhiimka ah.** Shirkadaha wax soo saara, kuwa qaybiyo, iyo shirkadaha silsiladda waxsoosaarka ee soo saaraya ee qaybinaya alaabada iyo adeegyada aasaasiga ah ee gudaha iyo warshadaha sida dawooyinka, tikniyoolajiyadda, cilmiga bayoteknoolojiga, daryeelka caafimaadka, kiimikada iyo jeermis dilka iyo qaadida qashinka iyo burburinta, beeraha, cuntada iyo cabitaanka, gaadiidka, tamarta, birta iyo alaabada birta ka samaysan, batroolka iyo shidaalka, macdanta, dhismaha, difaaca qaranka, isgaarsiinta, iyo sidoo kale badeecadaha ay adeegsadaan Ganacsiyada iyo Hawgallada kale ee Muhiimka ah.

w. **Shaqooyinka ururka shaqaalaha ee muhiimka ah.** Hawlaha lagama maarmaanka ah ee Ururka Shaqaalaha oo ay ka midka yihiin maamulka caafimaadka iyo lacagta daryeelka iyo shaqaalaha hubinta samaqabka iyo badbaadada xubnaha bixiya adeegyada Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka ah - haddii baaritaanadaas lagu sameeyo taleefan ama meel fog haddii ay suurtagal tahay.

x. **Hoteellada iyo huteellada kuyaala waddada geeskeeda.** Hoteellada iyo huteellada kuyaala waddada geeskeeda, ilaa xadka loo isticmaalo hoyga iyo keenida ama ka fulinta adeegyada cuntada.

y. **Adeegyada aaska.** Aaska, qolka maydka, gubida, aasitaanka, qabuuraha, iyo adeegyada la xiriira.

13. **Hawlgallada Aasaasiga ah ee Ugu Yar.** Ujeeddooyinka Amarkan, Hawlgallada Aasaasiga ee Ugu Yar ayaa waxaa ka mid ah kuwan soo socda, oo la siinayo in shaqaaluhu u hoggaansamaan Shuruudaha kala fogaanshaha Bulshada, illaa inta suurogal ah, inta ay fulinayaan hawlgalladaas:

a. Hawlaha ugu yar ee lagama maarmaanka u ah in la ilaaliyo qiimaha alaabada ganacsigu ku jiro, in la ilaaliyo xaalada warshadda iyo qalabka ganacsiga, in la hubiyo nabadgelyada, habka mushahar bixinta iyo gunnooyinka shaqaalaha, ama shaqooyinka la xiriira.

b. Hawlaha ugu yar ee lagama maarmaanka u ah si ay u fududeeyaan shaqaalaha ganacsigu inay sii wadaan ka shaqeynta meel fog oo ah guryahooda.

14. Safarka Lagama Maarmaanka ah. Ujeedooyinka Amarkaan, Safarka Lagama Maarmaanka ah waxaa ku jira safar kasta oo le ulajeeddooyinkan soo socda. Shakhsiyaadka ku hawlan Safar kasta oo Lagama Maarmaan ah waa inay u hoggaansamaan dhammaan Shuruudaha Kala Fogaanshaha Bulsho sida lagu qeexay Qeybtaan.

a. Safar kasta oo la xiriira siinta ama marin uhelida howlaha Lagama Maarmaanka ah, Shaqooyinka Dawladda ee Muhiimka ah, Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka ah, ama Hawlgallada Aasaasiga ah ee Ugu Yar.

b. U safrida si loo daryeelo shakhsiyaadka da'da ah, carruurta ah, ku tiirsanaha ah, shakhsiyaadka naafada ah, ama shakhsiyaadka kale ee nugul.

c. Aadida ama ka imaanshaha xarumaha waxbarashada oo ujeeddooyinku yihiin helitaanka agabyada loogu talagalay waxbarashada masaafada, helitaanka cuntada, iyo adeegyada kale ee la xiriira.

d. Safarka si aad ugu laabatid meel aad deggan tahay oo ka baxsan sharciga xukunka.

e. Safarka loogu baahan yahay sharci xoojin ama amar maxkamadeed, oo ay kujirto in la qaado carruurta iyadoo la raacayo heshiiska haynta.

f. Safar loogu baahan yahay dadka aan degganeyn inay ku noqdaan meeshii ay degganaayeen oo ka baxsan Gobolka. Shakhsiyaadka ayaa si xoogan loogu dhiirigelinayaa inay hubiyaan in safarkooda ka baxa Gobolka uu sii shaqaynayo kahor inta aadan bilaaban safar noocaan ah.

15. Shuruudaha Kala Fogaanshaha Bulshada. Ujeeddooyinka Amarkan, Shuruudaha Kala Fogaanta Bulshada waxaa ka mid ah ku haynta Kala fogaanshaha bulshada ugu yaraan ilaa lix-dhudhun ee shakhsiyaadka kale, ku dhaqista gacmaha saabuun iyo biyo ugu yaraan labaatan ilbiriqsi iyo inta ugu badan ee suurogalka ah ama isticmaalka jeermis dilaha, daboolida qufaca ama hindhishada (gacmaha shaatiga ama suxulka, mana aha gacmaha), si joogto ah u nadiifinta meelaha dusha sare laga taabto, iyo gacmahana dadka ha ku salaamin.

a. Tallaabooyinka loo baahan yahay. Ganacsiyada iyo Howlgallada Muhiimka ah iyo ganacsiyada ku hawlan Howlgallada Aasaasiga ah ee Ugu Yar waa iney qaadaan tallaabooyin firfircoon si loo xaqiijiyo u hoggaansanaanta Shuruudaha Kala Fogaanshaha Bulshada, oo ay kujirto meesha ay suurtagal tahay:

i. Cayim masaafo dhan lix-fuudh. Ku cayimida saxeex, xarig, ama hab kale inay u dhexayso lix-fuudh oo loogu talagalay shaqaalaha iyo macaamiisha iyadoo la joogtaynayo masaafada habboon;

ii. Fayadhawrka gacmaha iyo alaabada jeermis dilida. Haysashada fayadhawrka gacmaha iyo alaabada jeermis dilida oo diyaar u ah shaqaalaha iyo macaamiisha;

iii. **Kala saar saacadaha hawlgalka ee loogu talagalay dadka nugul.** Hirgelinta saacado hawlgal oo gooni u ah waayeelka iyo macaamiisha nugul; iyo

iv. **Ku helista khadka tooska ah ee internetka iyo ka fogaanshaha.** Soo dhigida khadka tooska ah haddii ay xaruntu furan tahay iyo sida ugu wanaagsan ee lagula xiriiri karo xarunta loona sii wadi karo adeegyada lagu bixinayo taleefanka ama meel fog.

16. **Ujeedada Amarkan.** Ujeeddada Amarkan waa in la hubiyo in tirada ugu badan ee dadka iskood isugu go'doomiyay meelaha ay deggan yihiin illaa inta ugu macquulsan ee suurtogalka ah, iyadoo loo oggolaanayo adeegyada lagama maarmaanka u ah inay sii socdaan, si loo yareeyo faafitaanka caabuqa COVID-19 illaa inta ugu badan ee suurogal ah. Markii dadku u baahdaan inay ka baxaan meelahooda ay deggan yihiin, si ay u soo qabtaan Hawlaha Aasaasiga ah, ama u fududeeyaan waxqabadyo la oggolaaday oo lagama maarmaan u ah sii wadidda nolosha bulshada iyo ganacsiga, waa inay had iyo jeer sida ugu macquulsan uguna habboon ugu hoggaansamaan Shuruudaha Kala Fogaanshaha Bulsho. Dhammaan qodobada Amarkan waa in loo tarjumaa inay yihiin si loo fuliyo ujeeddadan.

17. **Dhaqangelinta.** Amarkaan waxaa dhaqangelin kara sharci fulinta Gobolka iyo kan degmada ilaa xadka sharciga Ohio dhigayo. Illaa iyo xadka sarkaal kasta oo dawladeed oo fulinaya Amarkan uu qabo su'aalo la xiriira adeegyada laga mamnuucay Amarkan, Agaasimaha Caafimaadka wuxuu halkan ku siinayaa waaxyaha caafimaadka deegaanka awooda ay kaga jawaabaan su'aalaha qoraal ahaan oo waafaqsan Amarkan.

18. **Macluumaadka COVID-19 iyo Liiska-hubinta ee Ganacsiyada/Loo shaqeeyayaasha.** Ganacsiga iyo loo shaqeeyuhu waa inay qaadaan talaabooyinka soo socda:

    a. U oggolow shaqaalaha ugu badan ee suurogalka ah inay ku shaqeeyaan guriga adigoo hirgelinaya xeerarka ay kamidka yihiin shaqeynta iyadoo taleefanka la adeegsanayo iyo shirarka fiidiyowga.

    b. Si firfircoon ugu dhiirigeli shaqaalaha buka inay guriga joogaan ilaa ay ka qandhada jabinayaan (ayagoo isticmaalin dawooyinka) ugu yaraan 72 saacadood (saddex maalmood oo buuxa) OO astaamaha xanuunku ka yaraadeen ugu yaraan 72 saacadood IYO ugu yaraan toddobo maalmood lasoo dhaafay tan iyo markii astaamuhu bilaabeen. Ha ka codsan inay kuu keenaan warqada dhakhtarka si aad u xaqiijiso xanuunka ama ay shaqaalaha la jirran cudurka hawo-mareenku kusoo noqdaan shaqada; xafiisyada dhakhatiirta iyo goobaha caafimaadka ayaa laga yaabaa inay aad u mashquulaan oo aanay awoodin inay u bixiyaan cadeymahaas wakthigan.

    c. Xaqiiji in xeerarkaaga fasaxyada jirradu ay cusbooneysan yihiin, isla markaana yihiin kuwo aan lahayn ciqaab si ay shaqaalaha jirran ugu saamaxdo inay joogaan guriga si ay u daryeelaan naftooda, carruurtooda iyo xubnaha kale ee qoyska. Tixgeli inaad ku dhiirigeliso shaqaalaha inay sameeyaan is-qiimaynta maalin kasta si ay u eegaan haddii ay qabaan wax astaamo ah oo ah caabuqa COVID-19 (qandho, qufac, ama neefta ku adkaato).

    d. Shaqaalaha u muuqda inay leeyihiin calaamadaha jirrada hawo-mareenka ka dhex saar shaqaalaha kale uguna dir guriga si dhakhso ah. Xaddid soo galitaankooda ganacsiga ilaa iyo inta ay bogsanayaan.

e. Ku xooji farriimaha muhiimka ah - guriga joog marka aad jirran tahay, isticmaal tallaabooyinka qufac iyo hindhishada, oo ku dhaqan nadaafadda gacmaha - dhammaan shaqaalaha, oo ku dheji boor meelaha ay u badan tahay in lagu arko. Bixi agabka ka hortagga sida saabuun iyo biyo, gacmo nadiifiye, sooftiyada iyo weelka qashinka ee aan la taaban si ay u adeegsadaan shaqaalahu.

f. Si joogto ah u nadiifi meelaha inta badan la taabto sida, goobaha shaqada, marfashyada dushooda, biraha jaraan-jarooyinka, gacan qabsiga albaabada iyo gacmaha albaabada. Adeegso agabka wax lagu nadiifiyo ee inta badan loo isticmaalo meelahan isla markaana raac tilmaamaha ku yaala warqada. Bixi nadiifiyayaal la tuuri karo si meelaha inta badan la isticmaalo ay ugu nadiifiyaan shaqaaluhu kahor adeegsi kasta.

g. Ku talagal inaad beddesho dhaqanada ganacsi haddii loo baahdo in la sii wado shaqooyinka muhiimka (tus., aqoonso qeybiyayaal kale, mudnaan kala sii macaamiisha, ama si ku meelgaar ah u jooji qeyb kamid ah shaqooyinkaaga).

19. **Ma jiraan wax xaddididda oo ku aadan awoodda.** Ma jiraan wax ku jira Amarkaan, sinaba, wax ka beddeli doona ama cusboonaysiin kara amar sharci oo u oggolaanaya Gobolka ama waax kasta oo caafimaadka deegaanka ka mid ah inay dalbadaan (1) karantiil ama go'doomin u baahan kara in shaqsigu ku sii jiro guri gaar ah ama xarun caafimaad oo loogu talagalay waqti xaddidan, oo ay kujirto muddada xaaladdani deg-degga ah ee caafimaadka dadweynaha, ama (2) xiritaanka goob cayiman waqti xaddidan, oo ay kujirto muddada xaaladda degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha.

20. **Qodobka kaydinta.** Haddii qayb ka mid ah Amarkan ama dalabkeeda quseeya qof ama duruufo ay ku qabato inay tahay mid aan ansax ahayn maxkamad kasta oo awood u leh, ciladdan ma saameynayso wax kale oo ah Amarkan, kaas oo la bixin karo natiijo la'aan ama dalab aan ansax ahayn. Si loo gaadho ujeeddadan, qodobada Amarkan waxaa lagu caddeeyey inay yihiin kuwo aan jebin karin kuwa kale.

21. **Amarradii hore ayaa la beddelay.** Amarkani wuxuu badalayaa, kaliya illaa inta uu khilaafsan yahay, wuxuuna wax ka beddelaa Amar kasta oo ka hor imanaya qodobada Amarkan.

22. **Muddada.** Amarkani wuxuudhaqan galayaa 11:59 p.m. taariikhdu markay tahay March 23, 2020 waxayna soconi ilaa 11:59 p.m. taariikhdu markay tahay briil 6, 2020, ilaa Agaasinka Waaxda Caafimaadka ee Ohio uu ka noqdo ama wax ka beddelo Amarkan waqti iyo taariikh intaa ka horreeya.

COVID-19 oo ah cudur neef-mareenka ku dhaca kaasoo sababi kara cudur halis ah ama geeri, waxaa sababa fayraska SARS-CoV-2, kaasoo ah nooc cusub oo coronavirus ah oo aan horay loogu aqoon bini-aadamka oo si fudud qofba qof kale u qaadsiin karo. Fayrasku wuxuu ku faafayaa shakhsiyaadka isku soo dhawaada (in ka yar qiyaastii lix-fuudh) isagoo soo raacaya dhibcaha neefsashada kasoo baxa marka qof cudurka qaba uu qufaco ama hindhisho. Waa suurtogal in shaqsiyaadku ay ku qaadi karaan COVID-19 ayagoo taabanaya dusha ama shay qaba fayraska ka dibna taabtaan afkooda, sankooda ama indhahooda.

Bishii Janaayo 23, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay diwaan-gelinta Dhacda maalmeedka Agaasimaha kaasoo ka dhigaya caabuq COVID-19 cudur laga soo tebin karo gobolka Ohio oo kujira heerka A.

Bishii Janaayo 28, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay martigelisay wicitaankii ugu horreeyay ee gobolka oo dhan iyadoo ay la xiriireen waaxyaha caafimaadka deegaanka iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee la xiriira COVID-19.

Bishii Janaayo 30, 2020, Guddiga xaalada Degdegga ah ee Xeerarka Caafimaadka Caalamiga ah ee Ururka Caafimaadka Adduunka ayaa ku dhawaaqeen dillaaca cudurka COVID-19 uu yahay xaalad caafimaad oo guud oo degdeg ah oo walaac caalami ah laga qabo.

Bishii Janaayo 31, 2020, Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha, Alex M. Azar II, wuxuu ku dhawaaqay xaalad degdeg ah oo caafimaad oo Mareykanka ah si uu uga caawiyo waddabja daryeelka caafimaadka bulshada sidii looga jawaabi lahaa caabuqa COVID-19.

Bishii Febraayo 1, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Shabakad Feejignaan Caafimaad oo heer gobol ah si ay u siiso waaxaha caafimaadka deegaanka iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka hagitaano cusub oo ku saabsan shuruudaha COVID-19 iyo Shaqsiyaadka Baadhitaanku ku Socdo (PUI) oo dib loo eegay.

Bishii Febraayo 3, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay tababartay in kabadan 140 shaqaale si ay ugu shaqeeyaan xarun wicitaan loogu talagalay caabuqa COVID-19, inta lagu jiro xilliga loo baahan yahay.

Bishii Febraayo 5, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay bilaabeen cusboonaysiinta iyo ogeysiinta warbaahinta tirada PUI-yada Ohio maalin kasta oo Talaado iyo Khamiis ah.

Bishii Febraayo 6, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio ayaa cusboonaysiisay dhammaan kaaliyayaasha agaasimeyaasha iyo madaxda shaqaalaha ee hay'adda ee u diyaargarowga caabuqa COVID-19 iyo maqaamka inta lagu jiro kulanka golaha Badhasaabka.

Bishii Febraayo 7, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio iyo Hay'adda Maareynta Xaalada Degdegga ah ee Ohio ayaa kulmay si ay u sameeyaan qorsheyn hore oo loogu talagalay caabuqa COVID-19.

Bishii Febraayo 13, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay ku qabatay Layliga Miiska ee Baahista Cudurka si hay'adaha Gobolka ay dib ugu eegaan ficillada jawaabahooda haddii ay ka dhacdo baahid cudurka ah Ohio.

Bishii Febraayo 14, 2020, Waaxda Caafimadka ee Ohio waxay qabatey shir wicitaan oo ay la yeesheen khubaro caafimaad oo ku baahsan gobolka. Ujeeddada wicitaanku waxay ahayd in lagu wargaliyo lana hawlgeliyo bulshada daryeelka caafimaadka ee Ohio. Bandhigyo ayay bixiyeen Waaxda Caafimaadka, Hamilton County Public Health, iyo Jaamacadda Ohio State.

Bishii Febraayo 27, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio iyo Hay'adda Maareynta Xaalada Degdegga ah ee Ohio waxay warbixin ka dhagaysteen agaasimayaasha hay'adaha Gobolka inta lagu gudajiray kulanka golaha Badhasaabka ee ku saabsan u diyaarsanaanta iyo kartida suurtagalinta Xarun Hawlgallo ee Xaaladda Degdegga ah.

Bishii Febraayo 28, 2020, "Wixii soo Kordhay ee Badhasaab DeWine, Agaasimaha Caafimaadka ee Qorshaha Ka Hortagga iyo Diyaargarowga caabuqa COVID-19" ayaa loo diray tiro badan oo ururo ah oo matalaya daryeelka caafimaadka, ilkaha, daryeelka muddada-dheer, dugsiyada K-12, kulliyadaha iyo jaamacadaha, ganacsatada, gaadiidka dadweynaha, ururada caqiidada ku saleysan, ururada samafalka, iyo dawladaha hoose.

Markay ahayd Maarso 2, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio ayaa samaysay Xarun Macluumaad Wadajir ah si ay iskuduwaan isgaarsiinta caabuqa COVID-19.

Markay ahayd Maarso 5, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay martigelisay Shirweynaha Badhasaabka ee ku saabsan Diyaargarowga caabuqa COVID-19, kulan uu la qaatay Badhasaabka Gobolka, agaasimeyaasha hay'adaha golaha, guddiyada waaxyaha caafimaadka deegaanka, iyo shaqaalahooda.

Markay ahayd Maarso 6, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay furtay xarun wicitaan oo looga jawaabo su'aalaha dadweynaha ay ka qabaan caabuqa COVID-19.

Markay ahayd Maarso 9, 2020, tijaabin ay sameysay Waaxda Caafimaadka ayaa xaqiijisay in seddex (3) bukaan ay ka heleen cudurka COVID-19 Gobolka Ohio. Tani waxay xaqiijineysaa jiritaanka xaalad khatar ah oo saameyn karta caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka muwaadiniinta Ohio.

Markay ahayd Maarso 9, 2020, Wakaalada Maareynta Xaaladaha Degdegga ah ee Ohio waxay hawlgalisay Xarunta Hawlgallada Xaaladda Degdegga ah.

Bishii Maarso 9, 2020, Badhasaabku wuxuu ku Dhawaaqay Xaalad Degdeg ah ee Amarka Fulinta 2020-01D.

Markay ahayd Maarso 11, 2020, Madaxa Ururka Caafimaadka Adduunka wuxuu ku dhawaaqay in caabuqa COVID-19 yahay mid adduunka ku baahay.

Markay ahayd Maarso 11, 2020, baaritaan ay sameysay Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay xaqiijisay in hal (1) bukaan oo dheeri ah uu ku dhacay cudurka COVID-19 Gobolka Ohio.

Markay ahayd Maarso 11, 2020, Waaxyaha Caafimaadka iyo Adeegga Ciidamada Hawlgabka ah ayaa soo saaray Amarka Agaasimayaasha Wadajirka ah ee lagu xadidayo galitaanka guryaha xannaanaynta lagu bixiyo iyo xarumaha la midka ah ee Ohio.

Markay ahayd Maarso 15, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha si loo xaddido marin u helidda jeelalka iyo xarumaha xirida Ohio.

Markay ahayd Maarso 15, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha oo lagu xaddidayay iibinta cuntada iyo cabbitaannada, aalkolada, biirka iyo waaynka in la fuliyo oo la qaato oo kaliya.

Markay ahayd Maarso 15, 2020, CDC waxay soo saartay Hagidda Kumeel Gaarka ah ee kulamada dadka badan ama munaasabadaha waaweyn ee bulshada, iyagoo sheegaya in munaasabadaha noocaas ah oo ka kooban 50 ama in ka badan oo dad ah la baajiyo ama dib loo dhigo.

Markay ahayd Maarso 16, 2020 Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha ee xiritaanka goobaha codbixinta doorashada koowaad ee Maarso 17, 2020.

Markay ahayd Maarso 17, 2020 Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha ee ku saabsan maareynta qalliinka iyo adeegyada aan muhiimka ahayn ee ku baahsan Ohio oo dhan.

Markay ahayd Maarso 17, 2020 Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha si loo xadido iyo/ama loogu mamnuuco isu imaatinka ballaaran iyo xiritaanka goobaha lagu caweeyo ee Gobolka Ohio.

Markay ahayd Maarso 19, 2020, Waaxda Caafimaadka ee Ohio waxay soo saartay Amarkii Agaasimaha oo lagu xidhiyo saluunada timaha, saluunada ciddiyaha, goobaha tima jarista, goobaha lagu sameeyo shabadaha, goobaha jirka lagu dalooliyo iyo goobaha duugista jirka.

Meelo badan oo ka mid ah Mareykanka waxaa ka jira “faafinta bulshada” ee fayraska sababa COVID-19. Faafinta bulshada, waxaa lagu qeexay gudbinta cudur aan la ogeyn halka uu ka bilawday, waxay ka dhigan tahay go'doomin meelo lagu yaqaano cudurka kuma filna in lagu xakameeyo faafitaanka.

Hay'adda CDC waxay sheegtay in dadku ay aad u gudbinayaan markay ugu badan yihiin astaamaha (kan ugu xanuunsan) si kastaba ha noqotee faafitaanka qaar ayaa suurtogal ah ka hor inta aysan dadku muujin astaamaha inkasta oo aysan taasi ahayn habka ugu weyn ee fayrasku u faafo.

Isu imaatinka balaaran (10 qof ama kabadan) waxay kordhisaa halista faafinta bulshada ee fayraska COVID-19.

Sidaas awgeed, si looga fogaado halis ku soo food leh oo ay suurtogal tahay in fiditaan baahsan lagu kala qaado caabuqa COVID-19 oo leh halis weyn oo waxyeello weyn u geysaneysa tiro badan oo dadka ka mid ah guud ahaan, oo ay ku jiraan waayeellada iyo dadka leh nidaamyada difaaca jirka ee daciifka ah iyo xaalado caafimaad oo daba dheeraaday, waxaan halkan **AMRAYAA** laga bilaabo 11:59 p.m. taariikhda markay tahay Maarso 23, 2020, dadka oo dhami waa inay joogaan guriga ama meesha ay deggan yihiin haddii aysan qabanaynin Hawlo Aasaasiga ah, Shaqooyinka Dawladeed ee Aasaasiga ah, ama inay ka shaqeeyaan Ganacsiyada iyo Hawlgallada Muhiimka ah sida lagu sheegay Amarkan. Amarkani wuxuu sii shaqayni oo dhaqan gal ahaan illaa 11:59 p.m. Abriil 6, 2020, haddii aanu Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Ohio ka laaban ama wax ka beddelin Amarkan waqti iyo taariikh xilligaa kahor. Illaa iyo xadka sarkaal kasta oo dawladeed oo fulinaya Amarkan uu qabo su'aalo la xiriira adeegyada laga mamnuucay Amarkan, Agaasimaha Caafimaadka wuxuu halkan ku siinayaa waaxyaha caafimaadka deegaanka awooda ay kaga jawaabaan su'aalaha qoraal ahaan oo waafaqsan Amarkan.

_____ Maarso 22, 2020

Amy Acton, MD, MPH
Agaasimaha Caafimaadka